



Sharaxaada Barnaamijka



Waa maxay Sharaxaada Barnaamijka?



Sharaxaada Barnaamijku waa nidaam isqiimeyn la fududeeyey oo kasoo ururiya xogta hogaaminta, qoyska iyo wareysiyada shaqaalaha si loo abuuro warbixin xog oo dejinaysa heerka horumarinta tayada hawlaha mudo saddex sano wareeg aqoonsi tayo ah.

Waa maxay sababta Sharaxaada Barnaamijku muhiim u tahay?

Sharaxaada Barnaamijku waa muhiim waayo waxay caawinaysaa aqoonsiga awoodaha iyo fursadaha horumarinta si kor loogu qaado tayada iyadoo la sameynaaya warbixin awood ku salaysan oo loogu talo galay:

- **Inay siiso** xog si loo bilaabo wareega aqoonsiga tayada saddexda sano midkiiba.
- **Lalawadaago** jawaabcelinta qoysaska caruurta si kor loogu qaado ka qeybqaadashada qoyska.
- **Taageero** barnaamijyada iyo qaababka horumarinta tayada joogtada ah.

Maxaa dhacaya inta lagu jiro Sharaxaada Barnaamijka?

Wareysiyada waxa loogu dhameystirayaa si madaxbanaan madal onlaayn oo loo yaqaan CECI (markii hore ahayd Coaching Companion) ama ay fududeeyeen shuraakadeena, Cultivate Learning, ee tilifoonka ama wicitaan muuqaala. Wareysiyada waxa ku jira:

Xarunta Daryeelka Cunuga/ECEAP/Head Start

- Agaasimaha
- Macalimiinta – ugu yaraan hal macalin deegaankii waxbarashaba
- Qoysaska– waxba loogama baahna

Daryeelka Cunuga ee Guriga Qoyska

- Xaqlaha
- Macalimiinta (haddii ay khuseys) – ugu yaraan hal macalin deegaankii waxbarashaba
- Qoysaska– waxba loogama baahna

Maxaa dhacaya marka xigta?

Tababarku waa u diyaar inuu caawiyo shaqada horumarinta tayada joogtada ah ee awoodaha gaarka ah, ahmiyadaha iyo aqoonsiga. Akhtiyaarada tababarida waxa ka mida:

- Isticmaalka warbixinta Sharaxaada Barnaamijka ee tababarka si loo aqoonsado meelo diirada la saaro.
- Abuurida qorshayaasha horumarinta, SMART¹ hadafyada, iyo qorshayaasha talaabooyinka ku saleysan habka, qiimaha iyo danaha adeeg bixiyaha.
- Ku hawlanaanta wareega tababarka ee waafaqsan baahiyaha gaarka ah.

Haddii aad jeclaan lahayd koobiyada dukumentigan oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xiriir Constituent Relations DCYF (Xiriirka Deegaanka DCYF) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION EPS_0063 SM (08-2021) Somali

1. SMART - Specific, Measurable, Attainable, Relevant, Timely (Gaara, Cabirikaro, Helikaro, Waafaqsan, Dhakhso ah).